



XAFIISKA XEER ILAALIYAHU GUUD EE QARANKA
OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL
مكتب النائب العام

WARBIXIN SANNADEEDKA 2024

www.ago.gov.so





TUSMO

I.	Farriinta Xeer Illaaliyaha Guud ee Qaranka	04
II.	Gogoldhig	05
III.	Xog Guud	06
IV.	Falanqeynta Xogta Xafiiska Xeer Illaaliyaha Guud	08
V.	Xogta Denbiyada Dowlad Goboleedyada	18
VI.	Tirokoobka Caruurta Bannaanada lagu tuuray	20
VII.	Tababarka Hawlwadeenada	21
VIII.	Tababarka Ardayda Jaamacadaha	22
IX.	Waxqabadka Xafiiska Xeer Illaaliyaha Guud	23
X.	Caqabdaha iyo Talo soojeedin	38

FARRIINTA XIGQ



“ Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranku waxa uu xoogga saaray ladagaallanka denbiyada lidka ku ah Anshaxa, lacag dhaqista iyo maalgenta argagixisada.”

Marwooyin iyo Mudanayaal,

Sharaf weyn ayay ii tahay in aan idinla wadaago warbixin Sannadeedka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ee Sannadkii 2024. Warbixintaan oo aan si joogta ah ula wadaageynay bulshada Soomaaliyed Shantii Sanno ee ugu denbeeysay taas oo aan ku soo bandhigno warbxingta guud ee Xeer Ilaalinta dalka, guulaha lagaaray, hiigsiga, siyaasadaha hor-tabinta u leh Xeer Ilaalinta Qaranka iyo waliba caqabadaha ku gadaaman.


Sanadkaan dhammaaday, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranku waxa uu xoogga saaray ladagaallanka denbiyada lidka ku ah Anshaxa, lacag dhaqista iyo maalgenta argagixisada, kuwaas oo guula aad u weeyn laga gaaray. Sidoo kale Xafiisku waxa uu Sanadkaan xoogga saaray kor u qaadista aqoonta iyo xirfadaha shaqaalaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka. Aqoon kororsiyadaas oo isgu jiray koorsooyin gaagaaban, tababarro waqtiveeyasan oo laxiriira xirfadaha sharciga iyo hannaanka barista denbiyada, Tababarradaas oo isugu jiray kuwa ku qabsoonay dalka iyo dibadda.

Sanadka cusub ee (2025), Xafiiska waxaa u degsan siyaasad cad oo lagu hormarinayo hannaanka caddaaladda, aqoonta shaqaalaha, sare u qaadista xirfadda denbi baarayaasha, kaaliyaasha iyo Xeer Ilaaliyaasha, taas oo looga gol-leeyahay hirgelinta istaraatijiyyadda mideeyasan ee garsoorka iyo horumarinta adeegga caddaaladda dalka.

Waxaan u mahadnaqayaa, una hambalyeeynayaa dhammaan bahda Xeer laalinta qaranka, gaar ahaan guddigii soo diyaariiyay warbixita iyo hawladeenada kale ee hawshan qiimaha badan surageliyay. Waxaan ku bogaadinayaa guud ahaan Shaqaalaha Xeer ilaalinta Qaranka sdai ay gutaan waajibkooda qaran iyo mas'uuliyaddooda sharci, waxaana markale ku boorrinayaa in ay sii labo jibbaaraan dadaalkooda. Waxa aan bahda Xeer Ilaalinta Qaranka u rajeynayaa Sannad wacan.

SULAYMAAN MAXAMED MAXAMUUD

[Farrinta Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka](#)



GOGOL-DHIG

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka Soomaaliya waxaa lagu aasaasay Xeerka Nidaamka Garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Xeer Lr: 03, ee 12-ka Juun 1962. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranku waxa uu qayb ka yahay Hay'adda Garsoorka Soomaaliya.

1 XOGTA GUUD

WAAJIBAADKA XXIGQ

Waajibaadka XXGQ waxaa lagu xusay xeerar dhawr ah oo ay ugu horreyaan Dastuurka dalka, Xeerka Nidaamka Garsoorka iyo Xeerka Habka Ciqaabta (XHC). XXGQ waa Xafis u madaxbanaan shaqooyinkiisa, tiirna u ah Dawladnimada, dabaqidda Xeerarka, Shuruucda Dalka iyo sarreynta sharciga. Waa Xafis adeeg lagama maarmaan ah siiya shacabka Soomaaliyeed. Waxaa waajibaadkiisa iyo masuuliyadihiisa ka mid ah arrimaha soo socda:

- » Ilaalinta iyo dhawridda xeerarka iyo shuruucda Dalka.
- » Oogista dacwadaha ciqaabta ah, ka hortagga iyo ka dabatagga danbiyada.
- » Kormeerka, hagista baarayaasha iyo baarista dacwadaha ciqaabta ah.
- » Ilaalinta iyo dhawridda xuquuqaha kala duwan ee mawaadiniinta Soomaaliyeed.
- » Xaqijinta sarreynta sharciga iyo ku dhaqanka xeerarka dalka iyo fulinta go'aanada sharci ah ee ka soo baxa hay'adaha dawladeed ee kala duwan.
- » Kormeerrida xaaladdaha nololeed iyo ilaalinta xuquuqda dastuuriga ah ee maxaabisti lueyihiiin.
- » Xaqijinta xuquuqda dadka nugul iyo ilaalinta danta guud ee cadaaladda.
- » Kaydinta xogta iyo ilaalinta diiwaanka danbiyada.



HIGSIGA XAFIISKA XXIGQ


In la yagleelo Xafis ku suntan adeeg Xeer Ilaalin heer sare ah, oo ilaaliya xuquuqda muwaadiniinta sidoo kalana dhiirrigaliya maamul cadaaladeed oo hufan, oo hubiya badqabka dadweynaha iyo dhawridda sharciga.

YOOLKA XAFIISKA


Yoolka Xafiisku waa in la helo adeeg Xeer Ilaalineed oo madax-bannaan, dhexdhedaad ah, xirfadysan, una adeegga si ay ku dheehan tahay hufnaan, dhawridda xuquuqda muwaadiniinta, hubinta ixtiraamka shariyada, helidda kalsoonida dadweynaha, ilaalinta maamul cadaalad-danbiyeed iyo ku dhaqanka dastuurka oo dalka oo dhan ka hirgala.

QIYAMKA ASAASIGA

1. Caddaalad
2. Madax-bannaani
3. Hufnaan
4. Dhex-dhexaad ah
5. Isla-xisaabtan
6. Xirfadlenimo



QAAB DHISMEEDKA XAFIISKA



2 FALANQEYNTA XOGTA XAFIISKA

TIRADA GUUD GALALKA LAGA FURAY XEER ILAALINTA DALKA

4,375

GALALKA GUUD

Xafiis yada xeer ilaalinta ee heer dowlad federaal iyo maamul goboleed ayaa diiwaangeliyay galal gaaraya 4,375 sanadkii 2024

2917

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, oo qaabilسان dacwadaha iyo kiisaska ka dhaca guud ahaan dalka, ayaa diiwaangeliyay 2,917 gal.

Galalkaan ayaa ka kooban:

Galalkan waxa ay ka kooban yihiin fal-dambiyeedyo kala duwan, sida xatooyo, musuqmaasuq, iyo ku xadgudubka sharciga, kisaska madaniga ah oo ay ku jiraan muranada dhaxalka, qandaraasyada, iyo dacwadaha kale ee madaniga ah, iyo dacwado la xiriira xuquuqda aadanaha, sida dilal sharci-darro ah, jirdil, iyo tacadiyo kale.

216 GAL

Hirshabeele

Xafiiska Xeer Ilaalinta Hirshabeele waxa u diiwaan gelyey 216 gal.

1,033 GAL

Koonfur Galbeed


Xafiiska Xeer Ilaalinta Koonfur Galbeed waxa u diiwaan gelyey 1,033 gal

209 GAL

GalMudug


Xafiiska Xeer Ilaalinta Galmudug waxa uu diiwaan gelyey 209 gal.





TIRAKOOBKA HAWLWADEENADA XXIQ

JAANTUSKA HOOLOWADEENA XAFIISKA XIG EE QARANKA



Jaantuska 1aad: Tirakoobka hawladeenada xafiska xeer Ilaaliyaha Guud

TIRAKOOBKA DACWADAH

2917


GALALKA GUUD EE
XXIQ SOO GALAY


1942

GALALKA
DHAMAADAY

975

GALALKA
SOCDA






Jaantuska 2aad: Xogta Galalka ee Bilaha ah ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka 2024

Faah faahinta Noocyada Dembiyada ee Dacwadaha Xafiika XIG Sanadka 2023-2024


Lmr	Nooca Dembiga	Tirada Eedaysa-nayaasha	Galal Hore	Galal la furay	Galal Socdo	Go'aan	Maxkamadaha Loo Gugbiyay	Xukun	
								Beri	Dembiiile
1	Dembiyada lid ku ah Nafta	2,053	250	1,173	557	477	389	102	287
2	Dembiyada Hantida	949	260	545	201	337	267	98	169
3	Dembiyada Maliyada	655	185	453	405	83	150	57	93
4	Dembiyada Tacadiga jinsiga	504	97	313	71	187	152	53	99
5	Dembiyada Maandooriyaha	354	129	317	46	130	141	40	101
6	Dembiyada Socdaalka	204	46	119	24	69	72	14	58
7	Dacwad oogista Madaniga	67	0	53	17	19	17	6	11
8	Dembiyada Internetka	41	0	29	5	13	11	4	7
9	Dembiyada Bada	46	5	24	4	11	14	3	11
10	Dembiyada Deegaanka	35	0	21	4	9	8	3	5
TIRADA GUUD		4,908	972	2,917	1,333	1,335	1,221	380	841

Shaxda 1aad: Noocyada Denbiyada ee Dacwadaha Xafiika XIG Sanadka 2023-2024

TIRAKOOBKA RACFAANADA




Jaantuska 3aad: racfaanada Maxkamada Racfaanka laga qaatay




Jaantuska 4aad: Racfaanada Maxkamada Sare laga qaatay




TIRAKOOBKA EEDEYSANAYAASHA



Jaantuska 5aad: Noocyada denbiyada



Jaantuska 6aad: Tirakoobka eedeysanayaasha



Jaantuska 7aad: Tirakoobka dhibanayaasha dhibanayaasha uu Xafiiska Xeer Ilaaaliyaha Guud ee Qaranku u adeegay sannadka 202

4,908Tirada Guud Ee
Eedeysanayaasha**4,373**

RAG

535

DUMAR

8,976Tirada Guud Ee
Dhibanayaasha**6,079**

RAG


2,897

DUMAR


TIRAKOOBKA

FALDENBIYEEDKA IYO DEGMOOYINKA

Faldembiyeedyada ay soo gudbiyeen hay'adaha iyo degooinka Gobolka Banaadir 2024



Jaantuska 8aad: Jaantuskani waxa uu sharxaya faldembiyeedyada ay soo gudbiyeen hay'adaha iyo degooinka Gobolka Banaadir 2024




Jaantuska 9aad: Jaantuskani waxa uu sharxaya Isbarbar-dhiga Faldenbiyeedyada ka dhacay Gobolka Banaadir 2020-2024

ISBARBAR-DHIGA


MARXALADAH A GALALKA

Marxalada ay marayaan galalka xafiska laga furay Sannadka 2024




Jaantuska 10aad: Jaantuskani waxa uu soo bandhigayaa marxaladaha ay marayaan galalka xafiska laga furay Sannadka 2024

Dembiyada Xatooyada




Jaantuska 11aad: Jaantuskani waxa uu isbarbar-dhigayaa denbiyada Xatooyada 2020 - 2024

Dembiyada Maaliyada




Jaantuska 12aad: Jaantuskani waxa uu dembiyada Maaliyada




ISBARBAR-DHIGA NOOCYADA DENBIYADA

Isbarbar-dhiga galalka si boqoley ah 2020 - 2024




Jaantuska 13aad: Jaantuskani waxa uu si boqoley ah isu bar-bardhigayaa Galaka Xafiiska soo galay Shanti Sanno ee la soo dhaafay




Jaantuska 14aad: Jaantuskani waxa uu soo bandhigayaa Noocyada Denbiyada ee Xafiiska soo galay sannadka 2024


Isbarbar-dhiga Galalka Xafiiska soo gaaray Bille ahaan 2020 - 2024



Jaantuska 15aad: Jaantuskani waxa uu si Bille ah isu bar-bardhigayaa Galalka Xafiiska soo galay 2020 - 2024




Jaantuska 16aad: Dembiyada Hantida




Jaantuska 17aad: Dembiyada Been Abuurka

Denbiyada Maandooriyaha




Jaantuska 18aad: Dembiyada Maandooriyaha

Denbiyada ka dhanka ah Tacadiga Jinsiga




Jaantuska 19aad: Dembiyada ka dhanka ah Tacadiga Jinsiga

Denbiyada Dilka



Jaantuska 20aad: Dembiyada Dilka

ISBARBAR-DHIGA MEYDADKA



Jaantuska 21aad: Isbarbar-dhiga meydadka la mariyey habraaca sharci ee aasidda

Xafiiska ayaa sannadka 2024 ogolaaday in la aaso 48 qof, oo 40 ka mid ah ay yihiin muwaadiniin iyo 8 ajaanib. Sannadkii 2023, waxaa la ogolaaday in la aaso 16 qof, 13 muwaadiniin iyo 3 ajaanib, halka 2022 ay ahayd 22 qof, oo 17 muwaadiniin iyo 5 ajaanib. 2021, 22 qof ayaa la ogolaaday in la aaso, 18 muwaadiniin iyo 4 ajaanib. Isbarbardhigga, tirada guud ee aaska ayaa kordhaysa sannad kasta, iyadoo tirada muwaadiniinta ay si weyn uga badan tahay ajaanbita.

3 XOGTA DENBIYADA DOWLAD GOBOLEEDYADA

DACWADAH XAFIISKA XEER-ILAALIYAH GUUD DOWLAD G. HIRSHABEELE

Guud ahaan Xafiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Dowlad-Goboleedka Hirshabeelle waxa uu qabtay sanadka 2024, dacwado tiradoodu tahay 216 dacwo, waxaa dhammaaday 93, waxaa wali socda 55.

216 

Dacwo ayuu xafiisku qabtay.

Shaxda Dacwadaha Xafiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Hirshabeelle

Lmr	Nooca Dembiga	Galal la furay	Galal Socdo	Go'aan	Maxkamadaha Loo Gugbiyay	Xukun	
						Beri	Dembile
1	Dil kas ah	28	12	04	12	03	09
2	Dil kama ah	02	00	01	01	00	01
3	Tuugonimo	44	05	22	17	06	11
4	Kufsi	20	03	02	15	05	10
5	Dhaawac	33	07	16	10	02	08
6	Burburin hanti	06	02	01	03	01	02
7	Burcadnimo	20	03	08	09	03	06
8	Isticmaal Maandoriyeed	03	02	00	01	00	01
9	Amar diido Garsoore	06	01	00	05	01	04
10	Dagaal Sifeen	04	01	02	01	00	01
11	Amaano Lunsasho	07	03	00	04	01	03
12	Dhileysi	04	01	02	01	00	01
13	Uur ku dilis latashi la'an	01	00	01	00	00	00
14	Galmo Isku jinsi	01	00	00	01	00	01
15	Hooy Galid Sharci darro ah	04	01	01	02	00	02
16	Iska Dhigid Qofkale	02	00	02	00	00	00
17	Isku Day Dil	04	01	02	01	00	01
18	Hanjabaad	07	04	01	02	00	02
19	Burburin Hanti	04	03	00	01	00	01
20	Turufo	05	03	00	02	00	02
21	Ganacs Xashiish	04	02	00	02	00	02
22	Guur Sharci Daro	01	00	00	01	01	00
23	Carqaladeyn gacan ku hayn hanti maguurga ah	04	01	01	02	01	01
24	Burinta waajibaadka Qoyska	02	00	02	00	00	00
Wadarta Guud		216	55	68	93	24	69

Shaxda 2aad: Dacwadaha Xafiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Dowlad-Goboleedka Hirshabeelle

DACWADAH A XAFIISKA XEER-ILAALIYAH GUUD

DOWLAD G. GAL-MUDUG

Guud ahaan Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Dowlad-Goboleedka Gal mudug waxa uu qabtay sanadka 2024, dacwado tiradoodu tahay 209, waxaa dhammaaday 165 oo isugu jira galal ka soo wareegay sanadkii hore iyo sanadkan, waxaa wali socda 109.

209 

Dacwo ayuu xafiisku qabtay

Shaxda Dacwadaha Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Gal-Mudug

Lmr	Nooca Dembiga	Eedaysan-ayaasha	Galal la furay	Galal Socdo	Go'aan	Maxkamadaha Loo Gugbiyay	Xukun	
							Beri	Dembile
1	Dil	39	10	32	16	26	00	26
2	Kufsi	33	06	26	10	22	10	12
3	Dhaawac	92	09	79	30	58	22	36
4	Tuugo	66	16	38	26	28	11	17
5	Afduub	22	17	22	21	18	06	12
6	Mukhaadaraad	13	07	12	06	13	05	08
Wadarta Guud		265	65	209	109	165	54	111

Shaxda 3aad: Dacwadaha Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Dowlad-Goboleedka Hirshabeelle

DACWADAH A XAFIISKA XEER-ILAALIYAH GUUD

DOWLAD G. KOONFUR GALBEED

Guud ahaan Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Dowlad-Goboleedka Koonfur Galbeed waxa uu qabtay sanadka 2024, dacwado tiradoodu tahay 1033 dacwo, waxaa dhammaaday 615, waxaa wali socda 206.

1033 

Dacwo ayuu xafiisku qabtay.

Shaxda Dacwadaha Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Koonfur Galbeed

Lmr	Nooca Dembiga	Galal la furay	Galal Socdo	Go'aan	Maxkamadaha Loo Gugbiyay	Xukun	
						Beri	Dembile
1	Dil	93	14	07	72	02	70
2	Kufsi	78	10	10	58	11	47
3	Dhaawac	174	43	41	90	20	70
4	Tuugonimo	118	08	44	66	34	32
5	Afduub	75	10	20	45	09	36
6	Dhulboob	113	33	19	61	15	46
7	Caasinimo	63	08	15	40	00	40
8	Been abuur	144	34	28	82	14	68
9	Amaano lunsi	120	31	22	67	26	41
10	Daraagis	55	15	06	34	09	25
Wadarta Guud		265	65	209	109	165	54

Shaxda 4aad: Dacwadaha Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Dowlad-Goboleedka Koonfur Galbeed




TIRAKOOBKA CARUURTA BANNAANADA LAGU TUURO

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxaa mas'uuliyaddiisa ka mid ah ilaalinta xuquuqda dadka nugul ama baahiyaha gaarka ah qaba iyo caruurga bannaanada lagaga tago ama isbitaalada lagaga dhuunto.

Haddaba, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, waxa uu Sannadka 2024 diiwaangeliyay 57 caruur ah oo isugu jira kuwo bannaanada lagu soo tuuray iyo kuwo isbitaallada lagu dhalay loogana dhuuntay. Ubadkaas Xafisku waxa uu xil iska saaray gacan-ku-hayntooda iyo barbaarintooda isagoo u xil saaray dad la xaqiijiayay, laguna aamini karo mas'uuliyadda loo xilsaaray.

57

XXIG wuxuu Diiwan geliyey 57 caruur ah oo isugu jira kuwo bannaanada lagu soo tuuray iyo kuwo isbitaallada lagu dhalay loogana dhuuntay



Jaantuska 22 aad: Tirakooka Caruurta bannaanada lagu tuuro

5 TABABARADA HAWLWADEENADA

Horumarinta xirfadaha
Hawldeenada.

Hawldeennada Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa ka faa'iidaystay tababaro gudaha dalka iyo dibadda ah oo lagu horumarinayo xirfadaha maaraynta fal-dambiyeedyo, xalinta kiisaska madaniga ah, iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha. Tababaradan ayaa diiradda saaray isticmaalka farsamooyin casri ah si loo wanaajiyo hufnaanta shaqada xafiiska. Dadaalladan ayaa horseeday in hawldeennada xafiiska ay yeeshaan xirfado dhammaystiran oo ka caawiya fulinta hawlahooda si hufan, taasoo kor u qaaday kalsoonida lagu qabo xafiiska iyo awoodiisa in uu ilaaliyo sharciga iyo caddaaladda dalka.

TABABARADA

GUUD

19

Tababarada Guud: Hawldeennada Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa ka faa'iidaystay 19 tababaro oo diiradda lagu saaray horumarinta xirfadaha iyo aqoonta shaqada si loo xoojiyo waxtarka iyo hufnaanta adeegyada xafiiska.

9

TABABARADA DALKA LAGU
QABTAY

10

TABABARADA DIBADADA
LAGU QABTAY





50%

Sanadkii 2023, 11% ka mid ah hawldeennada ayaa helay tababaro. Sannadkan, qorshaheenna ayaa ah inaan kordhinnio tiradan, si loo gaarsiiyo 50%.

6 TABABARADA ARDEYDA JAAMACADAH

Horumarinta xirfadaha
Ardayda Jaamacadaha.

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, iyada oo la tixgelinayo baahida ardayda Soomaaliyed ee ka qalinjabiyyey kuliyadaha sharciga ee jaamacadaha gudaha iyo dibadda, waxa uu sannad kasta ardayda u fidiyaa tababbar xirfadeed. Tababbarkaan aaya ujeedadiisu tahay in ardaydu fahmaan shaqada hay'adaha garsoorka, si ay ugu dabaqaan casharradii ay barteen uguna kobciyaan khibraddooda iyo xirfadahooda. Ardayda ka faa'iidaysanaysa tababbarkan waxa ay kala yihii:



7

WAXQABADKA XAFIISKA XEER ILAALIYAHU GUUD EE QARANKA

01

**GUUSHA
OOGISTA
DACWADADA**

Xafiiska Xeer Ilaaaliyaha Guud ee Qaranka maadaama shaqadiisa ugu badan ay tahay oogista dacwadaha ciqaabta ah, xafiisku waxa uu ku guuleysey kiisaskii uu u gudbiyey maxkamadaha boqolkiba Todobaatan in ka badan.

02

**ADEEGA DADLA
NUGUL IYO
CARUURTA**

Xafiiska Xeer Ilaaaliyaha Guud ee Qaranka waxaa mas'uuliyaddiisa ka mid ah ilaalinta xuquuqda dadka nugul ama baahiyaha gaarka ah qaba iyo caruurta bannaanada lagaga tago ama isbitaalada lagaga dhuunto. Haddaba, Xafiiska Xeer Ilaaaliyaha Guud ee Qaranka, waxa uu Sannadka 2024 diiwaangeliyay 57 carruur ah oo isugu jira kuwo bannaanada lagu soo tuuray iyo kuwo isbitaallada lagu dhalay loogana dhuuntay. Ubadkaas Xafiisku waxa uu xil iska saaray gacan-ku-hayntooda iyo barbaarintooda isagoo u xil saaray dad la xaqijiijay in lagu aamini karo mas'uuliyadda loo xilsaaray.

03

**TAYEYN TA
HAWLWADEENADA**

Xafiiku waxa uu ku daalay sidii ay hawylawadeena xafiiska ka shaqeeyaa u heli lahayeen, tabbaro kor loogu qaadayo aqoontooda iyo xirfadooda. Sidaa darteed hawladeenadu waxaa ay heleen tabbaro kor loogu qaayeyey aqoontooda iyo xirfadooda, kuwaas oo lagu qabtay dalka gudihiisa iyo dibadiisaba, kuwaaso kor u dhaafaya ilaa 20 tababar.

04

**CARBINTA
ARDAYDA
BARATA SHARCIGA**


Xafiiska Xeer Ilaaaliyaha Guud ee Qaranka asaga oo tixgelinaya baahida ardayda Soomaaliyeed ee ka soo qalinjabiya kuliyadaha sharciga ee Jaamacadaha dalka iyo kuwa dibaddaba ay u qabaan barashada iyo fahamka shaqada hay'adaha garsoorka, waxa uu Sannad walba tababar xirfadeed u fidiyaa ardaydaas, si ay u fahmaan casharadii ay soo qaateen isla markaana khibradooda iyo xirfadooda kor ugu qaadaan. Xafiisku Sannadkan waxa uu tababar ardaydaan 46 ardey oo qaatay tababar u soconayey 6 Bilood



05

**Booqasha Xeer
Ilaaliyaha Guud
ee Sweden**

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa booqasho rasmi ah ku tagay dalka Iswiidhan (Sweden) gaar ahaan magaalada Istookhom (Stockholm), waxa uuna kulan kula yeeshay Xeer Ilaaliyaha Guud ee dalka Sweden Marwo Katarina Johansson Welin. Intii uu socday wada-xajoodkeenna laba-geesoodka ah, waxaa diiradda lagu saarnay xoojinta iskaashiga caalamiga ah ee la xiriira sharciga, gaar ahaan dambiyada isaga goosha xuduudaha.



06 **MAREEGAHA ARGIGIXISADA EE XAFIISKU XIRAY**

Xafiiska Xeer Ilaaliyah Guud ee Qaranka waxa uu codsaday Sanadkan 2023/2024 in la xiro Mareegyo (Websites), ay isticmaali jireen kooxaha argagixisada, waxaana la xiray 34 Mareeg, kuwaas oo ay kooxaha argagaxisada u adeegsan jireen inay ku faafiyaan warar been ah iyo inay ku qaldaan ummadda Soomaaliiyeed, dhalinyaradana ay ku marin habaabbin jireen. Sidoo kale Xafiiska waxa uu gacanta ku hayaa Mareego kale oo baaris ku socoto.



07

KORMEERADA IYO QIIMAYN

Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, gaar ahaan Qeybta kormeerka Boliiska & Hagista Baarista Dembiyada ayaa kormeer ku tagay taariikhdu markii ay ahayd 03/09/2024, Hogaanka Baarista Dembiyada (CID). kormeerka oo ujeedadiisu ahayd u kuur galidda habka Denbi baarista, hufnaanta, ku dhaqanka sharciga iyo Ilaalinta Xuquuqda Maxaabiista ku xiran CID-da.

08

CELINTA BADEECO DHACDAY

Xafiisku waxa uu taariikhdu markii ay ahayd 21/07/2024 Fuliyey Go'aanka ka soo baxay Hay'adaha Garsoorka, kaas oo ku saabsan in dib loo celiyo Badeecad ka kooban Todobo 7 konteenar oo Bur dhacay ah, kaas oo laga keenay dalka Turkiya isla markaana dib loogu celiyay meeshii laga keenay.



DASHA HOGGAAMINTA WAX KU-OOLKA AH EE BAHDA CADDAALADDA SOOMAALIYA

JUSTICE SECTOR TRANSFORMATIONAL LEADERSHIP FORUM

"HOGAAN WANAAGSAN IYO ADEEG HUFAN"

JOINT JUSTICE AND CORRECTION PROGRAMME - JJCP

LOCATION: KISMAAYO

13th - 16th JULY 2024



09

KA QAYBGALKA SHIRKA BAHDA CADDAALADA



Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa kaga qeybgalay taariikhdu markii ay ahayd 16/07/2024 magaalada Kismaayo shirka madasha Hoggaaminta wax-ku-oolka ah ee Bahda Cadaalada Soomaaliya. Shirkaas oo diiradda lagu saarayey muhiimadda ay leedahay tayeynta adeegyada cadaaladda, adkeynta iskaashiga iyo wadashaqeynta udhaxeysa hey'adaha cadaaladda dalka, si loo helo nidaam sharci oo hufan. Waxana leysla gartay in sare loo qaado aqoonta iyo xirfadaha Hogaaminta wanaagsan si loo gaaro danta guud ee Cadaaladda.



10 BOOQASHADA WAAXDA SGBV EE KENYA

Wafdi uu hoggaaminayo mid ka mid ah Xeer Ilaakiye ku xigeenka Xeer Ilaaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa taariikhdu markii ay ahayd 08/06/2024, howlo shaqo ku tagay Dalka Kenya. Wafdigas oo kakoobnaa 9 xubnood oo ka kala socda hey'adaha kala duwan ee ka shaqeeya Baarista denbiyada ayaa booqasho kutagay Xarunta Denbi Baarista Dalka Kenya iyo sidoo kale Sheeybaarka Foorensiga qaranka ee Kenya. Ujeeddada safarkaan ayaa daarnaa sahan la xiriira dhismaha Sheybaar qaran oo uu dalku yeesho iyo khibrad isweeydaarsi la xirira howlaha denbi barista. Wafdigas ayaa isugu jiray Saraakiil Boolis, Dhaqaatiir, Xeer Ilaakiyeaal iyo khubara kasocota Xafiska Xeer Ilaaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Machadka Tababarka Garsoorka



WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHADASTURKA
MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTIONAL AFFAIRS

BAXA DIYAARINTA ISTIRAATIJIYADA
BAHDA CADAALADDA
JUSTICE SECTOR STRATEGIC
PLANNING RETREAT

Sangar

SHAPING THE FUTURE


11-13 May 2024



11

KA QAYBGALKA DIYAARINTA ISTARAATIJIYADDA CADAALADDA

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa ka qaybgalay shir ku saabsanaa Banbaxa Diyaarinta Istaraatijiyyadda Bahda Cadaaladda Soomaaliya, kaas oo socday muddo Saddex Maalmod ah. Shirweynahaas waxaa furay Gudoomiyaha Maxkamadda Sare ee dalka, wawaana ka soo qeybgalay hoggaamiyeeyasha cadaaladda heer Federaal iyo Dowlad Goboleed.





12

**DHAARINTA
XEER ILAALIYAASHA
CUSUB**

Xafiiska Xeer Ilaaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa soo agaasimey Munaasabad lagu dhaarinayay Xeer Ilaaaliye Xigeeno Cusub oo loo qaataay Xafiiska Xeer Ilaaaliyaha Guud ee Qaranka kadib Markii ay ku soo bexeen Imtixaan Daah-furan oo loo qabtay dhalinyaro ka soo baxay Jaamacadaha lagu barto Sharciga.






13


WADA SHAQAYNTA XAFIISKA IYO HAY'ADDA TAYO DHAWRKA QARANKA

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa shir guddoomiyey kulan wada shaqayn oo u dhaxeeyey Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Hay'adda Tayo-dhowrka Qaranka Soomaaliyeed, shirkaas oo ay kasoo qaybgaleen hawladeenada labada hay'adood ayaa looga hadlay sidii si dhaw loogu wada shaqayn lahaa iyo in Hay'adda Tayo Dhawrku ay si joogto ah ugu soo gudbiso Xafiiska wixii warbixin dembi ah oo ay ku ogaato Hay'addu baaritaannada ay samayso si lamid ah hay'adaha kale eebaarista, si uu Xafiisku uga qaado tilaaboyinka sharciga ah.



**14****SOO DHAWEYNTA
WASIIRKA CADDAAALADDA
TURKEY-GA**

Xeer Ilaaifiya Guud ee Qaranka iyo Gudoomiyaha Maxkamadda Sare ee dalka ayaa kusoo dhoweyey Maxkamadda Sare Wasiir Kuxigeenka Caddaaladda ee Turkiga Acar iyo wafdi uu hogaaminayey, wefdigaas oo uu ka mid ahaa Safirka Turkiga ee Soomaaliya Danjire Alper Aktaş. Waxaa kulankaas looga wada hadalay iskaashiga Garsoorka Soomaaliya iyo Turkiga, iyo sidii loo xoojin lahaa xiriirkha soo jireenka ah ee labada dal.






15

CAFIS MAXAABIIS


Sanadkii tagay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa Cafis Madaxweyne kusii daayay 116 Maxbuus oo ku xirnaa Xabsiga Dhaxe ee Xamar iyo Xabsiga MBCC ee Ex kaantorool Afgooye kuwaas oo lagu sii daayey munaasabadda Bisha Barakeysan ee Ramadaan darteed.





16
DAAHFURKA
MAXKAMADA XABSIGA
MUQDISHO

Xeer Ilaliiyaha Guud Ee Qaran ayaa ka qaybgaley howlgelinta Maxkamad laga dhisay Xabsiga Muqdisho ee ku yaal KM7, taas oo loo dhisay qaab casri ah. Isaga oo Xeer Ilaliiyuhu madasha ka sheegay guulaha laga gaaray amniga iyo dhaqaalaha dalka in aan la xaqijin lahayn haddii aan dib-u-habeynta lagu sameeyn lahayn hannaanka caddaaladda iyo garsoorka dalka.




Arrimaha Dastuurka XFS

Ku-bijir Soomaaliya ee Heshii Lanka Dembiyada Aba uba iyo Borotokoolla

17

HISHIISKA DENBIYADA ABAABULAN


Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa ka qeyb galay Taariikhdu markii ay ahayd 23/11/2024 Xafladd lagu Saxiixayey ku biirista Soomaaliya ee Heshiiska Qaramada Midoobay ee la dagaalanka Dembiyada abaabulan ee Qaramada isga gudba iyo baratokoolladiisa. Heshiiskaan waa heshiis caalami ah oo lagula dagaalamo dembiyada abaabulan ee dalalka isaga gudba, si dembiilaha aysan ugu suura gelin in uu denbi ka geysto wadan, wadan kalena si nabad ah ugu noolaado, ayaa la soo saaray heshiiskaan Sannadkii 2000, kaasoo dadlalka saxiixay heshiiskaan u ogolaanaya in dambiiilaha si wada jir ah wax looga qabto. Ka mid noqoshada heshiiskaan ayaa Dalka Soomaaliya waxa uu u sahli doonaa sooqabasha dambiiilayaasha ka baxsada gacanta sharciga, arrintaan oo aan lagu guulaysan karin haddii aanad ka mid aheyn Heshiiskaan caalamiga ah.





18
ANSIXINTA
ISTARAATIIJIYADA
CADDAALADDA

Xafiska Xeer Ilaaifiya Guud ee Qaranku ayaa qayb ka noqday ansixinta kulan howleed socday muddo Saddex Maal mood kaas oo ay isugu yimaadeen bahda caddaaladda Soomaaliya. Kulankaas oo ay ujeeddadiisu ahayd Ansixinta Istaraatiijiyadda Bahda Cadaaladda Soomaaliya ee 2025-2030, kaas oo ay martigalinaysay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka XFS.






19

DHIIRI GALINTA ARDAYDA JAAMACADHA

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka Hon. Sulaymaan Maxamed Maxamuud ayaa Xafiiskiisa ku qaabilay Guddoomiye Ku xigeenka Xiriirka iyo Hormarka & Hormuudka kulliyada Sharciga & Qaanuunka ee Jaamacadda Muqdisho iyo arday ka mid ah Kuliyadda Sharciga kuna guuleystay tartan aqooneed ku saabsan mataalaada Maxkamadda (Moot Court) oo loo qabtay Ardayda 6 Jaamacadood oo dalka ah, ayaga oo si gaar ah mataalaada Maxkamadda ku metalayey doorka Xeer Ilaalinta (Dacwad Oogista).

Kulankaan ayaa Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ku guddoon siiyay Shahaado Sharaf Maamulka Jaamacada iyo Ardaydaguu laystaayaashaah, sidookalanadhiirigelin iyogarabistaaga usameeyayardakuguuleysatay tartanka.

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa talooyin siiyey ardayda madaama ay ka qayb galayaan tartan kale oo ay Jaamacadda iyo dalkaba ku meteli doonaan oo ka dhici doona dalka dibadiisa.



CAQABADHA XAFIISKA

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranku, waxa uu ka mid yahay Hay'adaha dawladeed ee sida xawliga ah u kobcaya, lyada oo ay taasi jirto haddana, waxaa jira caqabado waaweyn oo ku gudban in Xafiisku shaqadiisii u guto sida ugu haboon, Caqabadahaas waxaa ka mi ah:

1. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka caqabad ka haysta dhanka maaliyadda. Xafiisku waxa uu si maalinle ah adeeg la taaban karo ugu qabtaa Bulshada Soomaaliyeed, haddaba Xafiiska waxa ay caqabad ka haystaa dhanka miisaaniyada, sabababta oo ah shaqadda xafiiska uu qabto oo aad u baaxad wayn iyo miisaaniyadda ay dowladu u qoondeysay ayaan ahayn kuwo isu dhigma.
2. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxa uu si ku meel gaar ah ugu shaqeeyaa dhismaha Maxkamadda Gobolka Banaadir qayb ka mid ah, dhismahaas oo ay la degan yihiin hay'adaha kale e garsoorka, taasi waxa ay keentay in ay Xafisiyadu ay ciriiri nooqdaan, oo halkii Xafis ee loogu talagalay hal Xeer Ilaaliye iyo Kaaliy-ihisa ay hadda ku shaqeeyaan 3 ama 4 Xeer Ilaaliye, arintaasi waxa ay caqabad ku tahay habsami u socodka shaqada ay Xeer Ilaaliyayaashu sida maalin laha ah u qabtaan.
3. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka maadaama uu umadda Soomaaliyeed u qabto shaqo maalinle ah oo aan marna istaagi karin, sida gaarsiin warqadaha dadka uu Xafiisku ku wado baarista, kormeerka Xabsiyadda iyo Saldhigiyadda oo u baahan gaadiid lagu tago, tagista meel kasta oo danbi ka dhacay ama baarista danbigaas iyo shaqooyin kale oo aad muhiim u ah, gaadiidka uu xafiisku hayso iyo waajibaadka laga rabo ayaan ah kuwo aan isku dhigmin.
4. Sida caadiga ah Xafiisku waa sharci fuliyaha ugu wayn ee Hay'adaha dalka, xafiiska ayay shaqadiisa dhani ku xidhan tahay shuruucda dalka, haddaba, waxa ay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka caqabad wayni ka haysataa dhanka shariyadda dalka oo ah kuwa duugobay, ama la curiyay waqtii hore iyo dhamaystir la'aanta dastuurka oo ay ku xiran yihiin wax ka bedelka shariyada.

TALO SOO JEEDIN

Si wax looga qabto caqabadaha aan sare ku soo sheegnay, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxa uu soo jeedinayaa talooinka soo socda, kuwaas oo uu u arko in ay lagama maarmaan u tahay shaqada uu Xafiisku u haayo Qaranka Soomaaliyeed:

1. Xafiisku waxa uu soo jeedinayaa in dowladdu kor u qaado miisaaniyadda Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, si wax looga qabto caqabadda dhanka miisaaniyadda ah ee Xafiiska haysata, una fududaato shaqada uu sida maalinlaha ah ugu qabto dadwaynaha.
2. Wixa aan soo jeedinayaa in uu Xafiisku helo dhismo u gaar ah oo ku haboon shaqada uu u hayo bulshada, sida in Xeer Ilaaliye kasta uu u helo Xafis u gaar ah, si loo ilaaliyo xogta qof kasta oo adeeg u soo doonta xafiiska, taas oo ah xuquuqda ay damaanad qaadeen Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.
3. In uu Xafiisku helo gaadiid ka badan inta uu hadda haysto, gaadiidka u shaqeeyaa Xafiiska ayaa si maalinle ah u qabta shaqo joogto ah. Helitaanka gaadiidkan ayaa waxbadan ka tari doona in shaqadu u socoto si haboon oo habsami leh.
4. Si ay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Hay'adaha danbi baaristu si wax ku ool ah ugu gutaan shaqadooda danbi baariseed, waxa aan soo jeedinayaa in la xoojiyo xirfadda iyo aqoonta danbi baarayaasha dalka, sidoo kalena in la helo qalab danbi baaris oo tayo sare leh sida qalabka lagu sameeyo baarista cilmiyeysan ee Forensic-gaa, kaas oo Meesha ka saari kara in uu baxsado qof danbi galay, sidoo kalena fududeyn karo shaqadda danbi baarista.
5. Ugu danbays waxa uu xafiisku soo jeedinayaa in wax laga qabto dibna loo habeeyo dhammaan shuruucda dalka ee duugowday, lana soo saaro shuruuuc la jaan qaadi karta waqtigan casriga ah ee uu caalamku marayo.



XAFIISKA XEER ILAALIYAHU GUUD EE QARANKA
OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL
مكتب النائب العام

WARBIXIN SANNADEEDKA 2024

